**FAAFINTA** **RASMIGA**

الرسمية الجريدة

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

لولاية ارض بونت الصومال

**Sanadka 8-aad. Garowe 25. January. 2007** **Lam. 1**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدةالشهرية

***Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

---

# TUSMADA

## Qeybta Koowaad

## Sharci

## Qeybta labaad

## Xeer

## Qeybta Saddexaad

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

***Sharci Lr. 3. ee 15/01/2007, kuna saabsan Sharciga Akedhemiyada Puntland ee Hidaha iyo dhaqanka.***

Sharciyada
(1) Akadeemiyada
(2) Shidaalka iyo gaaska
(3) bayEhumka
Xeebaha
daalada

bogaga 56-68

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOMALIYA**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Xafiiska Madaxweyne ku xigeenka**
**Ahna sii hayaha xilka Madaxweynaha**

**Office of the Vice-president**
**being an acting president**

---

**Sharci Lr.3 ee 15/01/2007, kuna saabsan Akedhemiyada Puntland ee Hidaha iyo dhaqanka.**

**Madaxweynuhu**

| | | |
|---|---|---|
| **Markuu arkay** | **:** | **Dastuurka DGPl qodobkiisa 55-aad faqraiisa 1-aad.** |
| **Markuu arkay** | **:** | **Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Sumad XGGW/DGPL/187/2006 ee 16/12/2006 ee sharciga Akedhimiyada Puntland ee Hidaha iy dhaqanka.** |
| **Asagoo Tixgaliyey** | **:** | **Ansixinta Golaha Wakiilada ee Sharcigan kore** |

**Wuxuu soo saaray**

**Sharcigan soo socda:-**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharcigan Akedhimiyada Puntland ee Hidaha iyo Dhaqanka sida kor ku cad.

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan garyaqaanka guud iyo kan xog-hayaha Golaha Wakiilada.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintii sharcigani faafinta rasmiga ah ee Dawlada ku soo baxay, wuxuuna kamid noqonayaa sharuucda Puntland, iyadoo cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo.

**Wabilaahi Towfiiq**

**Mud. Xasan Daahir Maxamuud**
**Madaxweyne ku xigeenka**
**ahna Sii haya Xilka Madaxwenaha**

Puntland State of Somalia
Office of the Vice President
Garoowe

# XEERKA AKAADEEMIYADA PUNTLAND EE HIDDAHA IYO DHAQANKA

## Xubinta 1-aad: Caddaymo

### Qodobka 1-aad

Erayada hoos ku qoran mid waliba marka uu ku jiro xeerkan, waxaa macnihiisu yahay, sida qodobka ku cad ee Erayga ku hor qoran, si kale oo macnahaas ka duwanna laguma sheegi karo.

| ERAY | MACNAHA LOOLA JEEDO |
|---|---|
| 1.DG Puntland | 1.Dawlad Goboleedka Puntland |
| 2. Madaxtooyada | 2.Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland |
| 3.Xukuumadda | 3.Xukuumadda Dawlad Goboleedka Puntland |
| 4.Wasaaradda | 4.Wasaaradda Warfaafinta,Dhaqanka,Dalxiiska,Boostada iyo Isgaarsiinta ee DGPL |
| 5.AKAADEEMIYADA | 5.Akaadeemiyada P.L. ee Hiddaha iyo Dhaqanka |
| 6. Xeerkan | 6.Xeerka Akaadeemiyada Puntland ee Hiddaha iyo Dhaqanka |
| 7.Gudiga Sare | 7.Gudiga sare (Board of Directors) ee Hogaaminta Akaadeemiyada Puntland ee Hiddaha iyo Dhaqanka |
| 8. Maamulka Fulinta ee Akaadeemiyada | 8.Maareeyaha Guud iyo waaxaha Akaadeemiyada PL ee Hiddaha iyo Dhaqanka |

## Xubinta 2 – aad. TILMMAAMO

### Qodobka 2 - aad

Akaadeemiyada Puntland ee Hiddaha iyo Dhaqanku waa hay'ad madax bannaan oo lagu dhisay xeer madaxweyne lr.,129 ee 15/08/2005.

### Qodobka 3 – aad.

Akaadeemiyada Puntland ee Hiddaha iyo Dhaqanka, waxay leedahay shakhsiyad qaanuuni ah, waxaana mar walba matala maareeyaha guud ee Akaadeemiyada ama ciddii kale oo markaas maareeyaha guud uu wakiisho.

2. Kaalmo ay ka hesho cid ka mid ah dadweynaha ama hay'ado gaar ah oo reer Puntland ah sida, NGO-yada, Jaamacadaha IWM.
3. Kaalmo ay ka hesho jaaliyadaha reer Puntland, waaxid ama wadar.
4. Ganacsi ay ka samayso wax - soo - saarkeeda, sida buugaagta, cajaladaha, filimmada, riwaayadaha, ijaarka fagaarayaasheeda, iibin qalab ay iska beddesho, aqoon gunno laga siinayo IWM.
5. Kaalmo ay ka hesho Dawladda Federaalka Soomaaliya
6. Kaalmo ay ka hesho cid ka mid ah dadweynaha ama hay'adaha gaarka ah ee Federaalka Soomaaliya.
7. Kaalmo ay ka hesho hay'ado goboleedyada ama kuwa caalamiga ah ee daneeya howlaha Akaadeemiyadu u xil saaran tahay.

**Qodobka 8 – aad.**

Maaliyadda iyo Hantida Akaadeemiyada waxaa loo maamulayaa si waafaqsan nidaam xisaabeedka DGPL.

**Xubinta 4 aad**

**Qodobka 10 – aad.**

**XILALKA IYO WAAJIBAADKA AKAADEEMIYADA**

Xilalka iyo waajibaadka Akaadeemiyada waxaa ka mid ah:-

1- Baarista, ururinta, hubinta, sugidda,weelgelinta, (qoraal, sawir ama filimayn) iyo faafinta taariikhda soo-yaalka ah ee Puntland, iyadoo la tixgelinayo taariikhaha kale ee ku dhex jira iyo kuwa ku xeeran , sida kuwa Soomaaliya,Geeska Afrika, derisyada kale ee Puntland iyo taariikhda adduun weynaha ee xiriirka la leh Puntland iyo Soomaaliya.

2- Ogaalka, sahaminta, tira-koobka, ilaaalinta, macnaynta, dayactirka iyo ka faa'iidaynta goobaha taarikhda ee Puntland, kuwa duugan, kuwa dhisan iyo kuwa wadhan intaba; sida taallooyinka, ahraamta, godadka iyo sallaxyada xardhan, agabyada iyo magaalooyinka duugan ee leh macnaha iyo qiimaha taariikheed.

3- Dhismaha, qalabaynta iyo habaynta muusimyo (museums ), lagu ururiyo, lagu xafido, laguna soo bandhigo, taariikhda hiddaha iyo dhaqanka ee Puntland (qoraal, sawir iyo agab). Iyadoo muusimka ugu weyn ee udub dhexaadka ah laga dhisayo magaala madaxda DGPL ee Garoowe,isla

markaana Gobolada DGPL mid walba laga dhisayo muusim u gaar ah oo ku salaysan dabeecadda iyo sifada Gobolkaas.

4. Dhiirigelinta dib u soo noolaynta iyo dib u dhaqan gelinta agab-soomaaligii hore, wixii isticmaalkoodu waqtiga la socon karo.
5. baadhista, soo bandhigidda iyo dib u dhaqan gelinta ( intii suurta gal ah), culuuntii Soomaalida (cilmiga cudurada iyo daaweynta, cilmiga felekiga, cilmi juqraafiga iyo badmmaaxnidda iyo guud ahaan culuumta kale ee dhaqanka iyo dhaqashada).
6 Dib u soo noolaynta ku dhaqanka fardaha iyo rakuubka .
7 Baadhista iyo horumarinta Afsoomaaliga.
8 La shaqaynta iyo horumarinta hawlaha Madax-dhaqameedka puntland /Soomaaliya.
9 Ku hawlgalka iyo dhiirigelinta, yagleelidda iyo assaasidda maktabadaha culuumta dhaqanka (Suugaanta,Culuumta Taariikhda iyo culuumta Qawaaniinta,)Sida qawaaniinta Caalamiga ah, xeerarka soomaalida iyo xeerarka Barlamaanada adduunka.
10 . Ururinta, weelgalinta, (Qoraal , cajalado, filimo IWM), suugaanta Reer Puntland (Gabay, Geeraar, Buraanbur, Hees hawleed IWM.) iyadoo la tixgelinayo lana muujinayo , xiriirka suugaantaasi la leedahay suugaanta qaybaha kale ee Soomaaliyeed, derisyada Soomaalida iyo suugaanta caalamka .
11. Hufidda, horumarinta iyo ka faa'iidaynta suugaanta Puntland/Soomaaliya.
12. Dib u soo dhaqan celinta, hufidda, horumarinta iyo fidinta noocyada kala duwan ee maaweelada dhaqanka u ah Puntland/ Soomaaliya sida jaanta, jiibka iyo sacabka, durbaanka, dhaantada, riwaayadaha iyo kuwa kale ee barbaryaal, iyadoo lala xiriirinayo noocyada maaweelada ee derisyada Puntland/Soomaaliya iyo kuwa caalamkaba.
13. Ku-wacyi gelinta shacbiga Puntland/Soomaaliya danahooda iyo waajibaadkooda dal iyo dad iyadoo wacyi-gelintaas loo adeegsanayo qalab kala duwan, habab kala duwan iyo farsamooyin kala duwan.

14. Iskaashi la yeelashada hay'adaha shaqada Akaadeemiyada xiriirka la leh ee DG Puntland, sida hay'adaha waxbarashada iyo hay'adaha warfaafinta iyo wacyi-gelinta, kuwa Soomaaliya, kuwa Goboleed iyo kuwa caalamiga ahba.
15. Si joogto ah u horumarinta iyo u casriyaynta qaababka howl fulinteeda iyo farsamo-adeegsigeeda.
16. La socodka, ka hor tagga iyo la dagaalanka dhammaan noocyada dhaqammada xunxun ee haraaga ah iyo kuwa soo galootiga ahba.
17. Soo xigashada iyo soo bandhigidda, xigmadaha iyo afkaarta wanaagsan ee shucuubta iyo ummadaha adduunweynaha.

## Xubinta 5 aad.

## KAALINTA WASAARADDA WARFAAFINTA DHAQANKA, DALXIISKA, BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA.

### Qodobka 11 aad

Wasaaradda warfaafinta, Dhaqanka, Dalxiiska,Boostada iyo is gaarsiinta DGPL, waxay Akaadeemiyada · ku leedahay kaalin ah:

1. Kor ka ilaalin iyo la socod howl fulinta iyo xil gudashada Akaademiyada.
2. Tilmaan ka siinta, Akaadeemiyada barnaamijyada dhow, kuwa dhexe iyo kuwa fog.
3. Talo ka siinta Akaadeemiyada, xagga xil gudashada iyo howl fulinta.
4. in ay Akaadeemiyada siiso wixii kaalmo ah oo ay u awooddo xag qalab,talo ama xiriirin.
5. In ay warbixin ka hesho socodka howlaha Akaadeemiyada mar kasta oo ay u baahato.
6. In ay xukuumadda DGPL warbixin ka siiso, socodka howlaha Akaademiyada markay xukuumaddu uga baahato.

## XUBINTA 6 – AAD.

## QODOBBO KALA DUWAN

### QODOBKA 12-AAD

Akaadeemiyadu waa in ay xiriir buxa iyo is faham shaqo oo wanaagsan la yeelato madax dhaqameedka Puntland /Soomaaliya.

### QODOBKA 13 AAD.

Akaadeemiyadu waa inay dadweynaha Puntland si buuxda oo joogto ah ugu baraarujiso uguna wacyi-galiso qiimaha wayn ee hiddohooda iyo taariikhdooda; iyadoo adeegsanaysa farsamooyin iyo tabo kala duwan.

### QODOBKA 14 AAD.

Qodob kasta oo si kooban xeerkan loogu dhigay, waxaa faah-faahinaya xeer hoosaadka Akaadeemiyada.

### QODOBKA 15 AAD.

Xeerkani waxuu dhaqan galayaa, marka uu saxeexo Madax-waynuhu, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.